Kaydso | Daabaco | Dib u soo bilow

Oregon Department of Human Services

Codsiga Diiwaan gelinta Shaqaalaha Bixiya Daryeelka Guriga (HCW) iyo Heshiiska

Codsigan Diiwaan gelinta Shaqaalaha Bixiya Daryeelka Guriga (HCW) ee Medicaid ayaa sharraxaya sida loo sameeyo waxyaabaha soo socda:

- La iskugu diiwaan geliyo daryeel bixiye ahaan lala leeyahay Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) Barnaamijka Dadka Waayeelka iyo Naafada ah (APD) oo la bilaabaa u hoggaansanaanta waajibaadka HCW
- Cusbooneysiinta macluumaadka diiwaan gelinta, iyo
- Helitaanka lambarka daryeel bixinta.

Ogow: Daryeel bixiyayaashu waa in ay haystaan lambarka daryeel bixinta si loo siiyo lacagta adeegyada la siinayo dadka u qalma Medicaid ee ku nool Oregon. Dhaqaalaha Medicaid-ka federaalka iyo gobolka ayaa lagu bixiyaa adeegyadani.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Kooxda U qaabilsan Xiriirka ee Adeeg Bixiyaha APD kala xiriir 800-241-3013 ama email u dir HCW.Enrollment@dhsoha.state.or.us Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Magaca daryeel bixiyaha

Gali magacaaga sharciga ah (*sida ku qoran kaarkaaga Social Security-ga ee hadda, oo ay ku jiraan xarfaha la socda magaca hore, sida Jr.*):

Hore:_____ Billawga magaca dhexe:_____ Dambe:_____

Magacyada la isku yaqaano ama magacyada kale ee la isitcmaalo:

Hore:_____ Billawga magaca dhexe:_____ Dambe:_____

Hore:_____ Billawga magaca dhexe:_____ Dambe:_____

Nooca daryeel bixiyaha la codsaday (*calaamadee dhamaan kuwa ku khuseeya*):

☐ Diiwaan gelinta cusub ee HCW (73-737)

☐ Dib u cusbooneysiinta lambarka daryeel bixiyaha ee HCW
Lambarka daryeel bixiyaha: _____

☐ Dib-u-diiwaan gelinta HCW
(*haddii lambarka daryeel bixiyaha uu xirnaa in ka badan 30 maalmood*)
Lambarka daryeel bixiyaha: _____

☐ Beddelaada magaca HCW
Lambarka daryeel bixiyaha: _____ Lambarka xafiiska qaybta:_____

Daryeel bixiyayaashu waa in ay shaaciyaan lambarkooda Social Security-ga (SSN). SSN-ka ayaa la iskaga baahan yahay:

- In ay caddeeyaan aqoonsigaaga [sida uu dhigayo 42 USC 405(c)(2)(C)(i)]
- In ay xaqiijiyaan in aan lagaa reebin in aad noqoto daryeel bixiye [sida uu dhigayo 42 CFR 455.104 iyo 455.436], iyo
- In ay soo sheegaan macluumaadka canshuurta [sida uu dhigayo 26 CFR 301.6109-1].

ODHS ayay dhici kartaa in ay macluumaadka u gudbiyaan Adeegyada Dakhliga Hoose (IRS) iyo Waaxda Dhakhliga Oregon sida uu dhigayo magaca iyo lambarka Social Security-ga (SSN) ee lagu bixiyay hoosta.

Miyaad oggoshahay in aad SSN-kaaga geliso ORCHARDS (nidaamka baaritaanka taariikh dembiyeedka) si aad ugu xirto oggolaanshaha hore baaritaanka taariikh dembiyeedka?
☐ Haa ☐ Maya

Ha ku dhaafin meel kasta oo ka mid ah qaybtan iyada oo bannaan. Haddii uusan foomku dhammeystirnayn, codsigaaga waa la diidi doonaa.

Cinwaanka jidka: _____ Magaalada: _____ Gobolka: _____
ZIP code-ka *(+4)*: _____ Degaanka: _____

Cinwaanka boostada *(haddii uu ka duwan yahay ka kor ku qoran)*: _____
Magaalada: _____ Gobolka: ____ ZIP code-ka *(+4)*: _____
Degaanka: _____

Taariikhda dhalasho: _____ SSN: _____

Lambarka telefoonka: _____ Cinwaanka email-ka: _____

Miyaa lagaa joojiyay ama lagaa reebay ka qayb qaadashada daryeel bixiye ahaan ee Medicare ama Medicaid-ka gobolka ama barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta (CHIP)? ☐ Haa ☐ Maya

Miyaad hadda leedahay ama weligaa yeelatay lambarrada daryeel bixinta ee Medicare, Medicaid-ka gobolka kale ama ODHS oo kale, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA), APD, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ama Qaybta Nidaamyada Caafimaadka ee OHA (OHA-HSD)? ☐ Haa ☐ Maya

Haddii ay jawaabtu haa tahay, halkan ku qor lambarka(ada) daryeel bixinta: _____

Ma ku noolayd meel ka baxsan gobolka Oregon shantii sano ee la soo dhaafay? ☐ Haa ☐ Maya
Haddii ay jawaabtu haa tahay, geli macluumaadka shaxanka hoose:

Sanadka Bilowga	Dhammaadka	**Magaalada**	**Gobolka**	**Dalka**	**Magaca(yada) laga isticmaalo gurigani**

Aqoonsiga jinsi ahaaneed — Sidee baad isku aqoonsan tahay in aad tahay? (*Calaamaddee dhamaan kuwa ku khuseeya.*)

☐ Haweeney ☐ Nin

☐ Aan jinsiyad gaar ah lahayn ‘non-binary’, midnaba isku aqoonsanayn ‘agender’, aan ku dhaqmin jinsiga ‘gender non conforming’ ama aqoonsi kale oo jinsiyad ahaaneed.

☐ Ma rabo in aan sheego

Ma waxaad naftaada u tixgelisaa in aad tahay qof jinsigiisa beddeshay ‘transgender’?

☐ Haa ☐ Maya ☐ Ma rabo in aan sheego

Luqadda

Luqadahee oo ay ku jiraan Luqadda Calaamadaha ee Maraykanka, ayaad ku hadashaa? (*Dooro dhamaan kuwa ku khuseeya*.)

Waxaan ku hadlaa [Dooro luqad] _____

waxaan sidoo kale ku hadlaa [Dooro luqad] _____.

Waxaan ku hadlaa luqad kale (*halkan geli luqadda*): _____

Luqadahee ayaad akhridaa? (*Dooro dhamaan kuwa ku khuseeya*.)

Waxaan akhriyaa [Dooro luqad]

waxaan sidoo kale akhriyaa [Dooro luqad] .

Waxaan akhriyaa luqad kale (*halkan geli luqadda*): _____

Jinsiyada iyo qowmiyadda — Sidee baad isku aqoonsan tahay in aad tahay? (*Calaamaddee dhamaan kuwa ku khuseeya.*)

☐ Afrikaan ah

☐ Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska

☐ Carab ah, Ka soo jeeda Bariga Dhexe

☐ Aasiya ka soo jeeda

☐ Madow/Maraykanka Madow ah

☐ Laatino/Latina/Latinx

☐ Wax ka badan hal jinsiyadeed

☐ U dhashay Hawaii ama Jasiiraddaha Baasifiga

☐ Caddaan ah

☐ Kuwo kale: _____

☐ Ma rabo in aan sheego

QAYBTANI SI KU TALA GAL AH AYAY U BANNAAN TAHAY

Heshiiska diwaan gelinta shaqaalaha bixiya daryeelka guriga (HCW)

Codsigan Diiwaan gelinta HCW iyo Heshiiska (*oo lagu tilmaamo in uu yahay Heshiiska*) ayaa qeexaya xiriirka ka dhexeeya gobolka Oregon, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS), Dadka Waayeelka iyo Naafada ah (APD), Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) iyo daryeel bixiyaha ee ku saabsan lacag bixinta ODHS ama hay'adaha ay maalgeliso ama ay oggolaatay ODHS in ay bixiyaan adeegyada hore loo sii oggolaaday, dowladdu maalgeliso ee guriga-dhexdiisa ee uu macmiilka-cidda loo shaqeeyo ee u qalma uu siiyo HCW.

Fadlan si taxaddar leh u eeg Heshiiskani ka hor inta aadan saxiixin. Wuxuu tilmaamayaa waajibaadkaaga daryeel bixiyaha Medicaid ahaan ee Oregon dhexdeeda. Ku guuldareysiga in la raaco Heshiiskan iyo waajibaadkani wuxuu keeni karaa in la joojiyo lambarkaaga daryeel bixinta iyo diiwaan gelintaada ama cawaaqib xumo kale.

U hoggaansanaanta sharciyada khuseeya

Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay oo ku raacsan yahay in:

A. Daryeel bixiyughu uu u hoggaansamo sharciyada iyo qawaaniinta, federaalka, gobolka, iyo degaanka ee la xiriira waxyaabaha iyo adeegyada sida uu dhigayo Heshiiskani. Tani waxaa ka mid ah balse aanay ku koobnayn Xeerarka Maamulka Oregon (OAR) 407-120-0325 (*u hoggaansanaanta qawaaniinta federaalka iyo gobolka*).

B. Haddii ay maxkamadi go'aansato hadalo ama qoddob kasta oo ka mid ah Heshiiskani uu yahay mid sharci darro ah ama khilaafsan yahay sharci kasta, hadalada iyo qoddobada soo haray ee Heshiiskani waa in ay sii jiraan. Xuquuqaha iyo waajibaadyada dhinacyada waa in loo arkaa oo loo dhaqan geliyaa sidii uu Heshiisku uusan ku jiran hadal iyo qoddob gaar ah oo loo haysto in uu yahay mid aan sax ahayn.

C. Ku guuldareysiga in loo hoggaansamo hadalada ku jira Heshiiskani ama xeerarka ODHS ee khuseeya waxay keeni karaan joojinta ama in la xiro lambarka daryeel bixinta ee daryeel bixiyaha. Daryeel bixiyuhu wuxuu yeelan karaa xuquuqda rafcaan qaadasho sida uu dhigayo OAR 411-031-0050 (Shaqaalaha Daryeelka Guriga ee ka diiwaan gashan Barnaamijka Macmiilka-Shaqaaleeya Daryeel Bixiyaha). Daryeel bixiyuhu waa soo sheegaha ay ku waajibto 'mandatory reporter', sida uu dhigayo ORS 419B.005 ilaa 419B.050 iyo ORS 124.050 ama 124.095. Daryeel bixiyayaasha waxaa looga baahan yahay in ay 24 saacadood maalintii, toddoba maalmood toddobaadkii ku soo sheegaan xadgudubka ama xadgudubka la tuhunsan yahay ee lagula kaco:

- Ilme,
- Qof weyn,
- Qof degan xarun dadka lagu xanaaneeyo, ama
- Qof helaya adeegyada caafimaadka dhimirka ama naafanimada maskaxda/korriinka.

Ku guuldareysiga in la soo sheego xadgudub ama xadgudub la tuhunsan yahay oo la geystay waa mid la is ciqaabi karo sharci ahaan wuxuu keeni karaa in la joojiyo diiwaan gelinta daryeel bixiyaha.

D. Haddii uu daryeel bixiyuhu bixiyo adeegyada gaadiidka la xiriira ama u kala safro inta u dhaxaysa guriga macmiilka isku hal maalin, daryeel bixiyuhu waa in uu leeyahay ama haystaa ruqsadda baabuurka lagu wado oo sax ah iyo caymiska baabuurka sida sharcigu dhigayo. Daryeel bixiyaha waxaa looga baahan yahay in uu ODHS siiyo caddeynta caymiska baabuurka lixdii bilood ee kasta, ama ka soo horreysa haddii caymiska dib loo cusbooneysiiyo. Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay in adeegyada gaadiidka la xiriira ama waqtiga safarka aanan la oggolaan doonin ama lacagtooda la bixin doonin haddii daryeel bixiyuhu uusan lahayn ruqsadda baabuurka lagu wado oo sax ah iyo caymiska baabuurka.

1. U qalmida macmiilka-cidda loo shaqeeyo

Daryeel bixiyaha waxaa la siin doonaa lacagta iyada oo lagu saleynayo:

- Heshiiskani,
- Heshiiskii gorgortanka lagu galay ee u dhexeeyay Guddiga Daryeelka Guriga ee Oregon (OHCC) iyo Urrurka Adeega Shaqaalaha Caalamiga ah (SEIU), Local 503, iyo
- Xeerarka maamulka ee khuseeya ee dhaqan galka ah marka adeegyada la ansixiyay la siiyay macmiil-cidda loo shaqeeyo ee u qalma adeegyada guriga-dhexdiisa ee dowladdu maalgeliso.

Daryeel bixiyaha waxaa la siin doonaa lacagta adeegyada la oggolaaday ee ka tirsan qorshaha adeeg ee macmiil-cidda loo shaqeeyo iyo liiska hawsha ee ay oggolaatay ODHS ama Hay'ada Dadka Waayeelka ah (AAA). Lacag bixin kasta oo lagu sameeyo iyada oo la raacayo mid ka mid ah xaaladaha hoose waxaa loo arkaa lacag siyaado ah oo la bixiyay:

- Adeegyada aanan ku jirin qorshaha adeeg ee macmiilka-cidda loo shaqeeyo ansixiyay iyo liiska hawsha,
- Adeegyada la bixiyo saacado ka badan intii la oggolaaday, ama
- Adeegyada la siiyo macmiil-cidda loo shaqeeyo ee aan u qalmin adeegyada.

Wixii lacago siyaado ah ee la bixiyo waa in dib loo siiyaa ODHS oo ay noqotaa mas'uuliyada gaarka ah ee daryeel bixiyaha.

2. Diiwaan haynta, helitaanka iyo qarsoodinimada diiwaannada macmiilka-cidda loo shaqeeyo

Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay oo ku raacsan yahay in:

A. **Diiwaan haynta:**

i. Daryeel bixiyaha ayaa ka mas'uul ah dhammeystirka iyo sax ahaanshaha diiwaannada maaliyadeed iyo ilaalinta waqtiga (tusaale, xaashiyaha shaqada)

iyo dhammaan dokumentiyada kale ee ku saabsan adeegyada gaarka kuwaasi oo daryeel bixiyuhu sheegto magdhow. Daryeel bixiyuhu waa in uu hayaa dhammaan diiwaannada isaga oo si buuxda diiwaanka u gelinaya adeegyada gaarka ah ee la siiyo macmiilka-cidda loo shaqeeyo ee u qalma sida uu dhigayo Heshiiskani kuwaasi oo daryeel bixiyuhu sheegto magdhow, sida waafaqsan xeerarka maamulka ee khuseeya.

ii. Daryeel bixiyuhu waa in uu hayaa oo awoodaa in uu bixiyo dhammaan diiwaannada kor lagu tilmaamay ee ka tirsan 3(A)(i) hadba kii wakhtigeedu dheer yahay:

- Lix sano ka dib lacag bixinta kama dambeysta ah iyo joojinta Heshiiskani
- Muddo kasta sida uu farayo sharciga khuseeya, ama
- Ilaa laga gaarayo wixii xisaabin/hanti dhawr ah, muran/dood ama dacwad ah ee ka dhalata ama la xiriirta Heshiiskani waa mid dhammeystiran.

B. **Helitaanka:**

Dhammaan diiwaannada maaliyadeed iyo ilaalinta waqtiga iyo dhammaan dokumentiyada kale ee la xiriira adeegyada la bixiyay sida uu dhigayo Heshiiskani waa in laga dhigaa mid ay si degdeg ah u heli karaan hay'adaha soo socda iyo wakiiladooda sida saxda ah loo magacaabay si ay u baaraan, u xisaabiyaan 'audit', una sameeyaan nuqulo marka la codsado:

- ODHS
- OHA
- Macmiilka-cidda loo shaqeeyo
- Xafiiska degaanka ee APD ama AAA
- Waaxda Caddaalada ee Oregon Kooxdeeda Musuqmaasuqa Medicaid
- Xafiiska Xoghayaha Gobolka Oregon,
- Xarunta Adeegyada Medicare & Medicaid ee Maraykanka, iyo
- Dowladda federaalka ah.

3. Qarsoodinimada

Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay in daryeel bixiyuhu ay tahay in uu hayo dhammaan macluumaadka la xiriira qarsoodinimada macmiilka-cidda uu u shaqeeyo daryeel bixiyuhu. Daryeel bixiyuhu wuxuu macluumaadka la wadaago karaa oo kaliya maamulaha kiiska ee macmiilka-cidda loo shaqeeyo, xafiiska degaanka ee APD ama AAA ama kalkaalisada caafimaad ee bulshada ee la shaqaynaysa macmiilka-cidda loo shaqeeyo sida sharcigu uu fasaxayo.

4. Diiwaan gelinta firfircoon

Saxiixida uu saxiixayo heshiiskani, daryeel bixiyuhu wuxuu ku raacsan yahay in daryeel bixiyaha la heli karo oo uu awoodo in uu adeegyo siiyo hal ama ka badan oo ah

macmiil-cidda loo shaqeeyo ee u qalma adeegyada guriga-dhexdiisa ee dowladdu maalgeliso ee ka jira Oregon. Heshiiskani iyo diiwaan gelinta daryeel bixiyaha waa la joojin doonaa haddii adeegyada aan la oggolaan doonin ama lacagtooda la bixin muddo ku siman laba iyo toban bilood. Ka dib joojinta/xirista, daryeel bixiyuhu wuxuu dib u codsan karaa isku diiwaan gelinta HCW ahaan haddii daryeel bixiyuhu rabo in uu adeegyo siiyo macmiilka-cidda loo shaqeeyo ee ODHS.

5. U qalmida iyo ka qaybqaadashada sii socota

U qalmida iyo ka qaybqaadashada sii socota ee HCW ahaan waxay ku xiran tahay daryeel bixiyaha:

- Saxiixida Heshiiskani
- Dhammeystirka heshiiska marka la iskaga baahan yahay
- Buuxinta shuruudaha heerarka diiwaan gelinta ee lagu sharraxay OAR 411-031-0040
- Ku gudbida baaritaanka taariikh dembiyeedka, iyo
- Buuxinta dhammaan shuruudaha tababarka sida lagu tilmaamay OAR 418-020-0035 (*tababarka waajibka ah iyo heerarka qiimeynta kartida*).

Daryeel bixiyuhu waa in uu ku gudbaa hubinta xogta diiwaan gelinta ka hor diiwaan gelinta iyo dib u cusbooneysiinta. Tani waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, liiska ka reebida Xafiiska Guud ee Kormeeraha (OIG), liiska ka reebida Maamulka Abaalmarinta Nidaamka (SAM), Xafiiska Social Security-ga ee Faylka Muhiimka ee Dhimashada, iyo magaca sharciga ah ee IRS iyo caddeynta lambarka Social Security-ga.

6. Shaqo ka joojinta daryeel bixiyaha iyo dib u soo celinta lacag bixinta

Ku guuldareysiga codsigu in uu noqdo mid sax ah dhinac kastaba ama ku guuldareysiga in loo hoggaansamo hadalada ku jira Heshiiskani, xeerarka APD ama xeerarka Maamulka Caafimaadka Oregon waxay keeni karaan cunaqabatayn, iska joojinta Heshiiska ama dib u soo celinta lacag bixinta sida uu dhigayo OAR 411-031-0020, OAR 411-031-0040 ilaa 411-031-0050, OAR 411-034-0050 iyo 411-034-0055, OAR 411-020-0000 ilaa OAR 411-020-0130 iyo 410-120-1397 ilaa 410-120-1600. Daryeel bixiyuhu wuxuu yeelan karaa xuquuqda rafcaan qaadasho sida lagu sharraxay:

- OAR 411-031-0050 oo loogu talagalay shaqaalaha daryeelka guriga
- OAR 411-034-0055 oo loogu talagalay shaqaalaha daryeelka gaar ahaaneed, iyo
- OAR 407-007-0200 ilaa 410-007-0370 marka uu ku saleysan yahay baaritaanka taariikh dembiyeedka.

7. Xiriirka shaqada

A. Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay in daryeel bixiyuhu uusan shaqaale u ahayn gobolka Oregon, qayb kasta oo tirsan ODHS ama OHA, ama Hay'ada Dadka Waayeelka ah (AAA) ujeedooyin kasta ha ahaatee aan loo arag in uu yahay

shaqaalaha gobolka Oregon (marka laga reebo sida uu dejiyay sharcigu ee loogu talagalay ujeedooyinka gorgortan sida wadajir ah loo galo) ama AAA. Tixraac kasta oo la xiriira Guddiga Daryeelka Guriga diiwaanka cidda loo shaqeeyo ahaan waxaa kaliya loogu talagalay ujeedooyinka gorgortan sida wadajir ah loo galo sida uu dhigayo sharciga gobolka.

B. Macmiilka-cidda loo shaqeeyo ayaa ka mas'uul ah in uu helo, wareysto ama shaqaaleysiiyo daryeel bixiye u qalma. Hadalada ku dhigan xiriirka shaqadu waa mas'uuliyada macmiilka-cidda loo shaqeeyo in uu dejiyo waqti uu wax ku shaqaaleysiiyo.

8. Ka qayb qaadashada Medicaid

Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay oo ku raacsan yahay in:

A. ODHS ayaa xaqiijin doonta in macluumaadka uu shaaciyo daryeel bixiyuhu uu yahay mid run ah oo sax ah. Macluumaadkani waxaa loo isticmaali doonaa si loogu maamulo barnaamijka Medicaid.

B. Daryeel bixiyuhu uu ODHS la socodsiin doono wixii isbeddelo oo saameyn doona Heshiiskani, ama lacag bixinta loogu talagalay adeegyada caymiskooda lagu daboolo Heshiiskani, muddo (30) maalmood gudahood ah marka uu isbeddelku dhaco. Tani waxaa ka mid ah balse aanay ku koobnayn, isbeddelada ku yimaada magaca, macluumaadka la iskala soo xiriiro ama taariikh dambiyeed ah.

C. Daryeel bixiyuhu uu mar walba buuxiyo tababarka la iskaga baahan yahay iyo shahaadooyinka khuseeya oo uu noqdo qof xirfad ahaan karti u leh in uu u qabto shaqada sida uu dhigayo Heshiiskani. Ku guuldareysiga dhammeystirka ama buuxinta shahaadooyinka khuseeya waxay keeni kartaa in la joojiyo diiwaan gelinta daryeel bixiyaha.

D. Wixii xiriir ah ama ogeysiin kasta ee ka socda daryeel bixiyaha ee loogu talagalay ujeedooyinka Heshiiskani qoraal ahaan lagu siiyo xafiiska degaankaaga ee Dadka Waayeelka ah ee Naafada ah, Hay'ada Dadka Waayeelka ah (AAA) ama ODHS iyada oo si shaqsi ah loo keenayo, email ahaan, fax ahaan ama boosta caadiga ah.

E. Dhammaan macluumaadka uu soo gudbiyay daryeel bixiyuhu ee ku jira Heshiiskani uu yahay mid run ah oo sax ah. Wax kasta oo si ku tala gal ah looga tago, been abuurka ama ka been sheegida macluumaad kasta oo la bixiyo ama ka kooban xiriirada ku aadan ODHS waxaa dhici karta in ciqaabtooda la mariyo sharciga maamulka ama dembiyada ama labadoodaba. Tani waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn, diidmada soo saarida lambarka daryeel bixinta ODHS, iskala noqoshada lambarka daryeel bixinta ODHS iyo dib u soo celinta wixii lacago siyaado ah ee la bixiyo.

F. Daryeel bixiyaha looga baahan yahay in uu sheego wixii ciqaab-dambiyeed ah ee la xiriira ku lug yeelashada daryeel bixiyaha ee barnaamij kasta oo hoos yimaada Medicare, Medicaid ama barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta tan iyo bilowgii barnaamijyadaasi.

G. ODHS aysan lacagaha dadweynaha u isticmaali doonin in ay ku taageerto, gabi ahaan ama qayb ahaan, shaqaaleysiinta shakhsiyaadka awood kasta leh kuwaasi oo lagu xukumay dembi lagu aqoonsaday ORS 443.004(3) ee xiriirka la leh dad u qalma Medicaid.

9. Adeegyada

Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay oo ku raacsan yahay in:

A. Daryeel bixiyuhu uu qabto adeegyada lagu aqoonsaday qorshaha adeeg ee macmiil-cidda loo shaqeeyo iyo liiska hawsha iyadoo la raacayo xeerarka soo socda, hadba sida ay u khuseyso:

I. OAR qoddobka 411, qaybta 30 (Adeegyada Guriga-Dhexdiisa)

II. OAR qoddobka 411, qaybta 34 (Qorshaha Gobolka ee Daryeelka Shakhsi ahaaneed)

III. OAR qoddobka 411, qaybta 35 (Adeegyada Taageero ee K-State Plan)

IV. OAR qoddobka 411, qaybta 32 (Mashruuca Madaxa bannaan ee Oregon)

B. Daryeel bixiyuhu in uusan galin wax qandaraas-hoose ah ama uusan u oggolaanin qof kale in uu qabto adeegyada lagu oggolaaday Heshiiskan isaga oo ka wakiil ah daryeel bixiye. Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay in gelista qandaraas-hoose ama u oggolaanshaha qof kale in uu qabto adeegyada isaga oo ka wakiil ah daryeel bixiye loo arki in uu yahay musuqmaasuqa Medicaid oo la is ciqaabi karo sharci ahaan.

10. Bixinta lacagta

Daryeel bixiyuhu wuxuu fahamsan yahay oo ku raacsan yahay in:

A. ODHS ay tahay in ay lacag siiso daryeel bixiyaha isaga oo ka wakiil ah macmiil-cidda loo shaqeeyo kaasi oo loogu talagalay adeegyada uu bixiyay HCW sida uu dhigayo Heshiiskani ee hore loogu oggolaaday lacag bixinta. Lacag bixinta ay sameyso ODHS ee ka socda lacagaha dadweynaha waxaa khuseeya ORS 293.462. ODHS iyo waajibaadka daryeel bixiyaha marka la eego lacagaha ODHS ay siiso daryeel bixiyaha waxaa lagu sharraxay OAR qoddobka 411, qaybaha 27 iyo 31; OAR qoddobka 407, qaybta 120; iyo OAR qoddobka 410, qaybta 120.

B. Daryeel bixiyaha la la siin doono lacagta heerka mushaharka ee lagu heshiisay ee ku jira heshiiskii gorgortanka lagu galay ee u dhexeeyay OHCC iyo SEIU, 503.

C. Wixii lacag bixin ah ee loogu talagalaya adeegyada la siiyo macmiil-cidda loo shaqeeyo oo aanan u qalmin ama adeegyada aanan la oggolaanin waa mas'uuliyada gaarka ah ee daryeel bixiyaha. ODHS ma sameyn doonto lacag bixin iyada oo ka wakiil ah macmiil-cidda loo shaqeeyo oo aanan u qalmin ama adeegyada aanan la oggolaanin.

D. Lacag bixinta ODHS ee loogu talagalay wixii adeeg ah ee la bixiyay sida uu dhigayo Heshiiskani waa lacag bixinta oo dhan. Daryeel bixiyuhu lacag kama qaadi karo

macmiil-cidda loo shaqeeyo, ama qaraabo ama wakiilka macmiil-cidda loo shaqeeyo, taasi oo loogu talagalay:

- Waxyaabaha ku jira lacag bixinta adeega
- Waxyaabo kasta oo ODHS lacagteeda bixiso, ama
- Wixii adeegyo dheeraad ah ee daryeel bixiyuhu doorto in uu siiyo macmiil-cidda loo shaqeeyo.

Aqbalaada lacag bixinta, daryeel bixiyuhu wuxuu caddeynayaa u hoggaansanaanta dhammaan xeerarka ODHS ee khuseeya.

E. Shuruuda lacag bixinta ahaan, daryeel bixiyuhu uu buuxiyo oo ilaaliyo u hoggaansanaanta Heshiiskan iyo xeerarka lacag bixinta OAR 407-120-0300 ilaa 407-120-1505, OAR qoddobka 410, qaybta 120, 42 CFR 455.400 ilaa 455.470, hadba sida ay u khuseyso, iyo 42 CFR 455.100 ilaa 455.106.

F. ODHS ay dhici karto in ay dib u hesho wixii lacag siyaado ah ee la siiyo daryeel bixiyaha sida lagu oggolaaday OAR 410-120-1397 ilaa 410-120-1600 iyo iyadoo la raacayo heshiiska gorgortanka lagu galay ee khuseeya. Tani waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn: iska haynta lacag bixinta mustaqbalka ee la siinayo daryeel bixiyaha.

G. Lacag bixinta loogu talagalay adeegyada uu qabtay HCWee ka baxsan labada sanadood ah ‘biennium’ ee hadda ee wakhtiga saxiixu uu ku xiran yahay helitaanka ODHS ay Golaha Sharci-dejinta Oregon ka helayso qoondeynta, xaddidaadaha, ama maamulka kharashyada kale oo ku filan si ay ODHS u saamaxdo, xuquuqdeeda maamul ee macquulka ah, in ay sii wado lacag bixinta.

H. ODHS aysan lacag siin doonin daryeel bixiyaha ee loogu talagalay shaqada uu qabto:

- Ka hor inta aan la dhammeystirin heshiiska iyo soo saarista ODHS lambarka daryeel bixinta
- Ka dib marka heshiiska wakhtigiisu dhaca ama la joojiyo
- Ka dib marka baaritaanka taariikh dembiyeedka wakhtigeedu dhaco, ama
- Inta lambarka daryeel bixintu xiran yaha, la hakiyay ama si degdeg ah loo joojiyay.

I. Diiwaan gelinta daryeel bixiyaha iyo soo saarista/bixinta lambarka daryeel bixintu uusan damaanad qaadayn shaqo ama xaddiga ugu yar ee shaqo.

J. Iyadoo la raacayo OAR 410-120-1300 iyo 411-031-0040, dhammaan sheegashooyinka loogu talagalay adeega waa in lagu soo gudbiyaa muddo 12 bilood gudahood ah laga bilaabo taariikhda adeega ama lama bixin doono lacagteeda.

11. Muddada iyo joojinta Heshiiska

A. Heshiiskani waa mid soconaya 2 sanadood laga bilaabo taariikhda la saxiixay. Daryeel bixiyuhu waa in uu soo gudbiyaa Heshiis cusub ugu yaraan toddobaatan maalmood ka hor inta aanay waqtigeedu dhicin si loo helo wakhti ku habboon oo lagu qabto hawsha.

B. ODHS way joojin doontaa, hakin doontaa ama xiri doontaa Heshiiskan haddii:

1. ODHS soo saarto amar kama dambeys ah oo ay dib ugula noqonayso lambarka daryeelka bixinta iyo diiwaan gelinta iyada oo lagu saleynayo natiijada sida ay dhigayaan hadalada iyo shuruudaha lagu dejiyay OAR 411-031-0050.
2. Daryeel bixiyuhu ku guuldareysto in uu waqtigeeda ku gudbiyo, macluumaad dhammeystiran oo sax ah ama wada shaqeyn la yeesho shuruudaha baaritaanka oo kasta marka laga reebo ODHS oo go'aamisa in uusan ahayn danta barnaamijka Medicaid.
3. Diiwaan gelinta daryeel bixiyaha la joojiyo sida ku cad Title XIX ee Xeerka Social Security-ga ama sida uu dhigayo barnaamijka Medicaid ama barnaamijka CHIP ee gobol kasta.
4. Daryeel bixiyuhu ku guuldareysto in uu soo gudbiyo tiro ah faraha la iska qaado hab ay go'aamisay ODHS muddo 30 maalmood gudahood laga bilaabo codsiga Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ama ODHS, marka laga reebo ODHS oo go'aamisa in uusan ahayn danta barnaamijka Medicaid.
5. Daryeel bixiyaha lagu helay ciqaab-dambiyeed, ama laga joojiyay ama laga mamnuucay ku lug yeelashada daryeel bixiyaha ee Medicare ama Medicaid ama Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta 10 sano ee la soo dhaafay
6. CMS ama ODHS go'aamiso in daryeel bixiyuhu uu ka been abuuray macluumaadka codsi oo kasta ama haddii CMS ama ODHS aysan xaqiijin karin aqoonsiga codsadaha daryeel bixiyaha ah
7. ODHS ku guuldareysato in ay hesho maalgelin, qoondeyn, xaddidaado, ama maamulka kharashyada kale oo gaarsiisan heer ay ODHS ama barnaamij gaarka ahi go'aamiyo in uu ku filan yahay in uu bixiyo adeegyada ama waxyaabaha lagu daboolay Heshiiskani.
8. Sharciyada federaalka iyo gobolka, qawaaniinta iyo tilmaamaha la raacayaa ay isbeddelaan ama ODHS u fasirto hab mamnuucaya:
    - Bixinta adeegyada ama waxyaabaha hoos yimaada heshiiska, ama
    - Bixinta adeegyada noocaas ah iyo waxyaabaha laga helo ilaha dhaqaale ee la qorsheeyay
9. Daryeel bixiyuhu uusan hadda ka dib u qalmin daryeel bixiye ahaan. Wax iska joojintu waxay dhaqan gali doontaa taariikhda daryeel bixiyuhu uusan hadda ka dib u qalmin.
10. Daryeel bixiyuhu ku guuldareysto in uu buuxiyo hal ama ka badan oo ah shuruudaha lagu maamulo uga qayb qaadashada daryeel bixiyaha diiwaan gashan ee ODHS ahaan. Tani waxaa ka mid ah shuruudaha ah in lagu gudbo baaritaanka taariikh dembiyeedka labadii sano ee kasta. Marka lagu daro joojinta, hakinta ama xiritaanka Heshiiska, lambarka daryeel bixinta ayaa si degdeg ah loo joojin karaa, iyadoo la raacayo OAR 407-120-0360. Wax adeegyo ama waxyaabo lama siin karo macmiilka-cidda loo shaqeeyo inta lagu jiro muddada joojinta.

11. Daryeel bixiyuhu ku guuldareysto in uu buuxiyo dhammaan tababarka la iskaga baahan yahay iyo shuruudaha qiimeynta.
12. ODHS waqti kasta ayay joojin kartaa Heshiiskan oo la haysto ogeysiin qoraal oo la siiyo daryeel bixiyaha.
13. Daryeel bixiyuhu waqti kasta ayuu joojin karaa Heshiiskan isaga oo ogeysiin qoraal ah shakhsi ahaan ama email ahaan ugu gudbiya xafiiska degaanka ama Hay'ada Dadka Waayeelka ah iyada oo ay ku qoran yihiin taariikhda dhaqan galka joojinta gaarka ah. Joojinta Heshiiskan kama fududeynayo daryeel bixiyaha wixii waajibaad ah ee loogu talagalay adeegyada la daboolay ama waxyaabaha la bixiyay taariikhaha adeega inta uu Heshiisku dhaqan galka ahaa.

12. Daryeel bixiyaha wuxuu xaqiijinayaa:

A. Daryeel bixiyuhu in uusan ku xadgudbayn wax Sharciyada Canshuurta ee Oregon ah. Ujeedooyinka laga leeyahay aqoonsi bixintani 'certification', "Oregon Tax Laws" macnaheedu waa:
   - Canshuur dowladdeed uu soo rogay Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) 320.005 ilaa 320.150 iyo 403.200 ilaa 403.250, iyo
   - ORS qoddobada 118, 314, 316, 317, 318, 321, iyo 323, iyo
   - Canshuuraha degaanka oo ay maamusho Waaxda Dhakhliga sida ku cad ORS 305.620.

B. Daryeel bixiyaha in aanan looga baahnayn in uu dib u bixiyo canshuurta la iska hayo 'pay backup' iyada oo sababtu tahay:
   - Daryeel bixiyaha oo laga dhaafay canshuurta la iska hayo
   - Adeegyada Dakhliga Hoose (IRS) oo aan ogeysiin daryeel bixiyaha in uu mas'uul ka yahay canshuurta la iska hayo iyada oo sababtu tahay ku guuldareysiga in la soo sheego dhammaan lacagta dulsaarka ah ama faa'iidooyinka lacageed ee la wadaago 'dividends', ama
   - IRS oo aan la socodsiin daryeel bixiyaha in aysan hadda ka dib khuseysin canshuurta la iska hayo.

C. Daryeel bixiyuhu uu adeeygo siin doono macmiilka-cidda loo shaqeeyo iyada oo aan la eegin jinsiyada, diinta, dalka laga soo jeedo, lab ama dheddig, da'da, xaalada guur, dookha galmo, naafanimada (*sida lagu qeexay ee hoos yimaada Xeerka Naafada Maraykanka*). Adeegyada qandaraaska la siiyay waa in ay si macquul ah u sii qorsheeyaan baahiyaha dhaqan, luqaddeed iyo gaarka ah ee macmiilka-cidda loo shaqeeyo.

D. Daryeel bixiyuhu in uusan ku jirin liiska uu cinwaankiisu yahay "Specially Designated Nationals and Blocked Persons." Xafiiska Waaxda Maaliyadda Maraykanka qaybtiisa Maamuulka Hantida Shisheeye ayaa haysta liiskani, oo laga helayaa https://www.treasury.gov/ofac/downloads/sdnlist.pdf.

E. Daryeel bixiyuhu uu qirayo in Xeerka Sheegashada Beenta ah ee Oregon, ORS 180.750 ilaa 180.785, uu khuseeyo wixii sheegasho ah “claim” (sida lagu qeexay ORS 180.750) ee daryeel bixiyuhu sameeyo ama sababo oo ay khuseyso Heshiiskan ama adeegyada kuwaasi oo shaqo la xiriirta Heshiiskan la qabtay/fuliyay oo la codsaday lacag bixin.

- Daryeel bixiyuhu wuxuu xaqiijinayaa in aanay jirin sheegasho ama noqon doonin sheegasho been ah “false claim” (sida lagu qeexay ORS 180.750) ama fal uu mamnuucayo ORS 180.755.
- Daryeel bixiyuhu wuxuu si dheeraad ah u qirayaa in marka lagu daro xuquuqaha ku xusan Heshiiskan, haddii ay sameyso (*ama sababto in la sameeyo*) sheegasho been ah ama la qabto/fuliyo(*ama sababto in la qabto/fuliyo*) fal uu mamnuucayo Xeerka Sheegashada Beenta ah ee Oregon, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Oregon ay dhici karto in uu fuliyo mas’uuliyadaha iyo ganaaxyada ka tirsan Xeerka Sheegashada Beenta ah ee Oregon oo ka dhan ah daryeel bixiyaha.

13. Magdhwoga

Daryeel bixiyuhu waa in uu u soo magdhabaa oo gobolka Oregon, hay’adahiisa ama saraakiishooda, shaqaalaha iyo hay’adaha la xiriira ka difaacaa dhammaan sheegashooyinka, dacwada la iska gudbiyo, tallaabooyinka, qasaaraha, waxyeellooyinka, mas’uuliyadaha, kharashyada, kharashyada baxa ee nooc kasta leh ee soo baxa, ama la xiriira, falalka ama ka tegista/ka reebista ‘omissions’ ee darteel bixiyaha sida uu dhigayo Heshiisku.

14. Saxiixa daryeel bixiyaha

Saxiixida aan saxiixayo Codsiga Diiwaan gelinta Shaqaalaha Bixiya Daryeelka Guriga waxaan qirayaa in aan akhriyay Heshiiska diwaan gelinta, fahamsanahay hadalada Heshiiska, ku raacsanahay in ay ugu waajibiyaan hadalada iyo shuruudaha Heshiisku, oo caddeynayaa in dhammaan macluumaadka aan siiyay ODHS uu yahay mid run ah oo sax ah. Waxaan si intaasi ka badan u fahamsanahay oo ku raacsanahay in ku xadgudubka ka mid ah hadalada iyo shuruudaha ku jira Heshiiskani ay sabab u yihiin joojinta Heshiiskan waxaana dhici karta in ay sabab u noqdaan cunaqabataynta kale sida uu dhigayo qaanuunka, xeerka maamulka ama Heshiiskani.

Magaca daryeel bixiyaha oo daabacan: _____

_____ _____

Saxiixa daryeel bixiyaha

Taariikhda saxiixa
(*taariikhda dhaqan galka)*

Dokumentiga oo dhammeystiran u soo celi xafiiska degaanka ee Dadka Waayeelka ah ee Naafada ah ama xafiiska Hay'ada Dadka Waayeelka ah.

OGOW: *Foomkani wuxuu ka kooban yahay macluumaadkaaga shakhsi. Haddii aad foomka u soo celiso email aan sugnayn waxaa jira khatar ah in qof kale oo aadan u dirin uu dhexda ka qabsan karo.*
Haddii aadan hubin sida loo diro email-ka la isku halayn karo, mudnaanta sii in aad isticmaasho boosta caadiga ah ama fax.